



**Hagaha DHibcaha Koorsada Tacliinta Khadtka Internetdka CCS ee Rubaca 3aad iyo 4aad**

**23ka-Abril, 2020**

**(CCS Online Academy Grading Guidance for 3rd and 4th Quarters**

**April 23, 2020)**

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay aasaastay nidaamka dhibcaha fasalada preK-12 ee 3aad iyo 4aad inta lagu gudajiray waqtigan sii wadashada barashada internetka.

Waaxaha Adeegyada Tacliinta iyo la xisaabtanka ayaa taladooda u soo bandhigay Golaha Waxbarashada Columbus Talaadadii, 21ka-Abril. [Halkan guji si aad u daawato soo bandhigida](#).  
[\(Click here to watch the presentation\)](#)

### **Dugsiga Hoose fasalada (PreK-5) Dhibcaha Rubaca 3-aad**

- Muddada dhibcaha ee rubaca 3-aad, ee dhammaatay 24kii-Maarso, ayaa la gaarsiin doonaa 1da-May, 2020.Tani waxay u oggolaaneysaa ardaydaeena fursad ay ku **horumariyaan** dhibcahooda muddada rubaca saddexaad haddii midkoodna uusan dhammeystirin shaqooyinka loodiray, ka maqnaa kahor amarkii gudoomiyaha gobolka, ama laqabtay ilaa xiritaanka.
- Ardayna ma arki doono dhibcahooda oo hoos u dhaca ama wax u dhimaya kordhinta xiritaanka muddada rubaca 3-aad.

### **Dugsiga Hoose (Fasalada PreK-5) Dhibcaha Rubaca 4aad**

- Macallimiinta dugsiga hoose waxay u adeegsan doonaan calaamadaha soo socda rubaca 4aad:
  - Gudub (P) – ardaygu wuxuu dhammaystiraya shaqada iyo waxbarashadiisa.
  - Aan dhamaynin (I) – ma jiraan wax kooban ama majiraan caddayn shaqadii la dhamaystiray ama ardayga oo aan gaari karin.
- Arday kasta oo hela Xogta Aan dhammaystirnayn (I) waxaa la siin doonaa illaa 15ka- Sebtember, 2020, si ay u dhammaystiraan shaqadooda oo dib loogu habeeyo dhibcahooda gudbidda (P).
- Jaangooyoojin aan qiimeyn lagu sameynin inta lagu gudajiro rubaca 4-aad waxaa loo calaamadayn doonaa "Ma-qiimeynin (N)" inta lagu jiro muddadan.

### **Dhibcaha wareegga labaad (Fasalada 6-12) Rubaca 3-aad**

- Muddada dhibcaha ee rubaca 3-aad, ee dhammaatay 24kii-Maarso, ayaa la gaarsiin doonaa 1da-May, 2020.Tani waxay u oggolaaneysaa ardaydaeena fursad ay ku **horumariyaan** dhibcahooda muddada rubaca saddexaad haddii midkoodna uusan dhammeystirin shaqooyinka loodiray, ka maqnaa kahor amarkii gudoomiyaha gobolka, ama laqabtay ilaa xiritaanka.

- Ardayna ma arki doono dhibcahooda oo hoos u dhaca ama wax u dhimaya kordhintaa xiritaanka muddada rubaca 3-aad.

### **Dhibcaha wareegga labaad (Fasalada 6-12) Rubaca 3-aad**

- Macallimiinta wareegga labaad waxay u adeegsan doonaan calaamadaha soo socda rubaca 4aad:
  - Gudub (P) - ardaygu wuxuu dhammaystirayaa shaqada iyo waxbarashadiisa
  - Aan dhamaynin (I) – ma jiraan wax kooban ama majiraan caddayn shaqadii la dhamaystiray ama ardayga oo aan gaari karin.
- Arday kasta oo hela Xogta Aan dhammaystirnayn (I) waxaa la siin doonaa illaa 15ka-September, 2020, si ay u dhammaystiraan shaqadooda oo dib loogu habeeyo dhibcahooda gudbidda (P).
- Ugu danbeytii ma jiri doonaan imtixaanno la bixiyo koorsooyinka wareegga labaadee sannad dugsiyeedka 2019-2020.
- Nidaamka dhibcaha ee gudub (P) ama (I) waxaa lagu sameyn doonaa koorsooyinka Meelaynta Sare (AP) iyo koorsooyinka Waxbarashada Caalamiga ah (International Baccalaureate) (IB).
- Koorsooyinka Cilmiga Kuljeekha (CCP) ayaa raaci doona hagidda kuljeekha ama hagista jaamacadda.
- Ardayda dugsiga sare ee hada aan ku jirin jidkii ay ku hanan lahaayeen shuruudaha qalin-jabinta waxay diirada saari doonaan dib u soo kabashada buundada iyagoo u maraya nidaamka Edmentum. Hoos ka fiiri macluumaad dheeri ah.

### **Xisaabinta Fasalada Ugu Dambeeya iyo GPA ee wareegga labaad (Fasalada 6-12)**

- Celceliska Heerka Fasalka (GPA) waxay u soo muuqan doontaa sida "0" rubaca 4-aad laakiin wax saameyn ah kuma yeelan doonto isku-darka ardayga ee GPA.

Fasalka ugu dambeeya ee koorsada wareegga labaad waxaa lagu xisaabin doonaa qaybinta isla'egta ah ee rubacyada 1, 2, iyo 3 boqolkiiba ama Xisaabta celceliska Tayada dhibcaha saddex meelood saddex meel - hadba kii ka sarreeya.

- Koorsooyinka-semesterka labaad waxay muujinayaan heerka rubaca fasalka 3-aad iyo fasalka ugu dambeeya si isku mid. Gudubka (P) ama Aan dhamaynin (I) wali waxaa loo adeegsan doonaa rubaca 4-aad laakiin saameyn kuma yeelan doonto heerka u dambeeya ama dhibcaha.

### **Hagista iyo Taageerida Dhibcaha Dugsiga Hoose iyo Wareega Labaad**

- Macallimiintu waxay sii wadi doonaan inay xoogga saaraan qorshaha waxbarasho ee goonni-goonida ah (IEP) ee yoolalka loogu talagalay ardayda ubaahan adeegyada waxbarashada gaarka ah.
- Cashirada loogu talagala waxaay noqon doontaa ugu yaraan hal asbuuc ama in kabadan kadib casharada loo xilsaaray, oo u-ogolaanaya waqtii ku filan ardayda inay ku dhammaystiraan cashirada. Waafajin ayaa loo sameyn doonaa ardayda u baahan waqtii dheeri ah si ay u soo gudbiyaan shaqada la dhammaystiray ama kuwa aan awoodin inay galaan internetka.

### **Dammaanad qaadka Akhrinta Fasalka Saddexaad**

H.B. 197, sharciga deg-deg ah ee wax looga qabanayo masiibada cudur fidiyaha COVID-19 ee ka dhacay Ohio, ayaa looga tanaasulay imtixaanada gobolka sanad dugsiyeedka 2019-2020.

Maaddaama aysan jirin wax imtixaan ah oo dammaanad qaadaya Akhriska Fasalka Saddexaad, maamulaha ardayga iyo macalinka akhriska ayaa dib u eegi doona xirfadaha akhriska ardayga si loo ogaado haddii ardayga uu tacliin ahaan diyaar u yahay in loo gudbiyo fasalka afraad.

### **Shuruudaha Qalin-jabinta**

H.B. 197, sharciga deg-deg ah ee wax looga qabanayo masiibada cudur fidiyaha COVID-19 ee ka dhacay Ohio, ayaa cadeeyaa in ardayda jidka u haysay inay qalin jebiyaan dhamaadka rubaca seddexaad waxay ku sii jiri doonaan wadada iyada oo aan loo eegin xiritaanka dugsiga ee la dheereeyey. **Haddii ardayda fasalka 12-aad ay haysta wadada loo maro inay qalin jebiyaan ka hor xidhitaanka dugsiyada gobolka oo dhan, waxay kusii nagaan doonaan wadada ilaa afarta rubaca 4-aad.**

Ardayda aan wadada tooska ah haysan waxay ku qancin kara shuruudaha iyada oo loo marayo shaqada koorsada onlaynka ah inta lagu jiro xidhitaanka. Shuruudaha ugu yar ee gobolka ayaa loo adeegsan doonaa Qalin-jabinta (Cohorts) 2018, 2019, iyo 2020 cudurkan dartiis. Tani waxay meesha ka saaraysaa shuruudaha soosocda ee Fasalka 2020, marka lagu daro ardayda Fasalada 2018 iyo 2019 ee wali u baahan inay buuxiyaan shuruudaha:

- Koorsada Dhibcaha Teknoloojiyadda (Technology Course credit)
- Dhibcaha dheeraad ah ee Koorsada xulashada (Additional Elective Course credit)
- 120 saacadood shaqo barasho (120 internship hours)

Degmadu waxay dib u soo celin doontaa shuruudaha qalin-jabinta Fasalka 2021 iyo wixii ka dambeeya.

### **Heerka dhibcaha iyo Uqalmitaanka Ciyaaraaha**

- Nidaamka dhibcaha wuxuu u oggolaanaya Degmadu inay raacdoo shuruucda u qalmidda ee Ururka Isboortiga ee Dugsiga Sare ee (OHSAA) iyadoo la sugaayo oggolaanshaha Golaha Waxbarashada ee Columbus. Ardaydu waa inay kasbadaan dhibcaha gudbida ugu yaraan shan koorso hal-jeer ah ama u dhigma (koorsooyin sanad dugsiyeed) una qalma inay ku tartamaan tartamada fudud xilliga dayrta.
- Ardayda-ciyaartooyda ah ee ka fiiranaya inay ku ciyaraan heerka kulleejada, Xarunta U-qalmitaanka NCAA waxay tixgelinaysaa oo qudha buundooyinka u dambeeyey ee la diiwaan-galiyay. Dhibca kasta oo gudbitaan (P) ama Aan dhammaystirnayn (I) kuma jiri doono qoraalka ugu dambeeya oo si xun usaameeya ardayga u-qalmitaanka NCAA mustaqbalka.

### **Bayaanka ka yimid Kormeeraha Guud /CEO Dr. Talisa Dixon**

Nidaamkan dhibco-bixinta wuxuu siiyaa dabacsanaan ardaydeena, qoysaskooda, iyo barayaasheena inta lagu guda jiro muddada lagu baranayo khadka Online-ka guriga. Wuxaan rabnaa inaan siinno ardaydeena khibrado waxbarasho oo macno leh, laakiin waxaan sidoo kale dooneynaa inaan hubino taas markaan sameyno, wax dhibana uma geysaneno ardaydeena heerar kala duwan oo ah helitaanka teknolojiyadda iyo taageerada guriga.

Shuruudaheena waxbarasho ee durugsan ee ardaydeena badankood gacantooda kuma jiraan, sidaa daraadeed waxaan rabnaa inaan noqonno kuwa dabacsan isla markaana sida ugu macquulsan u taageera una tixgelinno baahida dareenka-bulsho ee ardaydeena. Nidaamkan darajooyinka wuxuu ardayda u oggolaanayaan dabacsanaanta waqtiga si ay u dhammaystiraan shaqadooda isla markaana lama ciqaabi doono kuwa ay yar tahay iney helaan khadka internetka.